

1115 Bandhiga Ka dhaafitaanka Medicaid 2022-2027 codsiga dib u cusboonaysiinta

Soo koobida Faallooyinka Dadweynaha iyo Jawaabaha OHA

OHA waxay codsatay faallooyin guud oo dadweyne oo ku saabsan qabyo qoraalka 1115(a) codsiga dib u cusboonaysiinta ka dhaafitaanka laga bilaabo Diseembar 7, 2021 illaa Janaayo 7, 2022. Xisbiyada xiisaynaya ayaa lagu martiqaaday inay ka faalloodaan shirar dadweyne oo taxane ah, iyaga oo adeegsanaayo iimayl ama warqad, ama iyada oo loo maraayo xog-uruurin la soo geliyey mareegta OHA. Dad badan oo ku nool daafaha gobolka ayaa bixiyay faallooyin badan oo kala duwan. Fariinta faallooyinka qoran iyo qoraallada faallooyinka oraahda ah ayaa la soo gelin doonaa barta Oregon.gov/1115WaiverRenewal waxyar ka dib u soo gudbinta codsiga kama dambaysta ah xagga CMS-ta. Shaxyada soo socdaan, OHA waxay ku soo koobtay faallooyinka mawduuc ahaan waxayna xustay jawaabta hay'ada.

1. Dhiiragelinta daryeel simman

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	<p>Soo koobida: U doodayaasha xubnaha OHP, CBO, iyo koox u ololaysa CCO ayaa taageero u muujiyay isbadelka lagu sameynaayo qaab dhismeedka guddiga halbeegyada halka CCO gooni ah ay walaac ka muujisay wax ku saabsan isbadelka. U doodaha xubinta ayaa walaac ka muujiyay wax ku saabsan diiradda aan ku filneyn ee ku aadan carruurta iyo dhallinyarada qaba baahiyaha daryeelka caafimaadka gaarka ah (CYSHCN) ee dadka deegaanka. Kooxda u ololaysa CCO ayaa walaac ka muujisay in halbeeyo badan ay u horseedi karaan isciiltaanka bixiyayaasha.</p>	
1.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Xubnaha OHP iyo U doodayaasha</p> <p>Soo koobida Faallooyinka: Taageerada: Taageerada guud ee loogu talagalay in diiradda lagu saaro go'aamiyaasha bulshada ee caafimaadka iyo wax ka qabashada cunsuriyadda qaabdhismeedka Walaacyada iyo tallooyinka: Walaaca ku saabsan diirada aan ku filneyn ee Carruurta iyo Dhallinyarada qaba Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka Gaarka ah (CYSCHN)</p>	<p>Jawaabta:</p> <p>OHA waxay ka mahadnaqeysaa falcelinta ku saabsan barnaamijka cabiraadaha dhiiragelinta iyo taageerada loogu talagalay diiradda la saarayo sinnaanta caafimaadka. OHA waxay badineysaa cabirka mitirka sare ee loo dejiyay laga bilaabo 3-5 ilaa lix si loo xaqiijyo meel ku filan oo diiradda lagu saaro aagag badan oo sinnaanta caafimaadka ah. Tirada halbeegyada si taxadar leh ayaa loo tixgeliyey si loo xaqiijyo in sinnaanta si ku filan diiradda loo saari karo iyada oo aan culeys badan la saarin bixiyayaasha.</p> <p>Awooda u lahaanshaha in si toos loogu qaybiyo deeqaha dhiiragelinta tayada leh ee CBOs waa mamnuuc marka loo eego sharciga federaalka sidaa darteed ma aha isbadel la sii wadi karo.</p>
2.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: CCO, Isbitaalka, iyo Wakiilada Nidaamka Caafimaadka</p> <p>Soo koobida Faallooyinka: Taageerada: Qaar ka mid ah CCO iyo bixiyayaasha taageerada isbadelka qaabdhismeedka guddiga Walaacyada iyo tallooyinka: Rabitaanka nidaamka caafimaadka si loo sii joogteeyo qaab dhismeedka guddiga hadda jira iyo tixgelinta in lagu daro xubno cusub si wax looga qabto baahiyaha sinnaanta caafimaadka Codsiga loogu talagalay maalgelinta dhiiragelinta tayada leh si loogu diyaariyo CBOs Walaaca ku saabsan ku ilaalinta halbeegyada kor u kaca ilaa tiro/baaxad taas oo aan horseedeynin isciiltaanka bixiyaha Codsiga loogu talagalay doorka la dammaanad qaaday ee wakiilada Maamulka Caafimaadka Dadweynaha ee Deegaanka (LPHA).</p>	

2. Diiwaangelinta soconeyso ee ku aadan dadka waaweyn iyo carruurta

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	<p>Soo koobida: Ururada u doodista iyo bixiyeyaasha aan CCO ahayn ayaa muujiyay taageerada soo jeedinta Oregon ee la xiriirta u qalmitaanka joogtada ah ee carruurta iyo dadka waaweyn. Ma jiraan wax xisbiyo ah oo muujisay walaac ama soo jeediyey isbadelo.</p>	
3,	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Xubnaha OHP iyo U doodayaasha</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> • U qalmitaanka joogtada ah waxaa uu kordhiyaa helitaanka daryeelka loo siman yahay • Waxay ka hortagi kartaa natiijooyinka caafimaadka ee taban 	<p>Jawaabta:</p> <p>OHA waxay u mahadnaqaysaa taageerada ku aadan siyaasadan waxayna u ilaalisay siyaasada sida ay ahayd.</p>
4.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Daryeelka Caafimaadka, Ururada Bulshada, iyo Bixiyeyaasha Adeegga Bulshada</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Waxay ka caawineysaa inay dadka daboosho oo ay ka yarayso isku dhex yaaca 	

3. U qalmitaanka dib u soo noqoshada

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	<p>Soo koobida: Faalo-bixiyeyaasha, dhammaan ururada u doodista ama u doodayaasha xubinta, waxay ka soo horjeedsadeen codsiga Oregon ee ku aadan ka dhaafitaanka shuruudaha si ay u bixiyaan u qalmitaanka dib u soo noqoshada oo waxayna codsadeen in laga saaro ka dhaafitaanka.</p>	
5.	<p>Soo koobida: Faalo-bixiyeyaasha, dhammaan ururada u doodista ama u doodayaasha xubinta, waxay ka soo horjeedsadeen codsiga Oregon ee ku aadan ka dhaafitaanka shuruudaha si ay u bixiyaan u qalmitaanka dib u soo noqoshada oo waxayna codsadeen in laga saaro ka dhaafitaanka.</p>	<p>Jawaabta</p> <p>Maadaama OHA ay haysan jirtay ka dhaafitaan si ay ugu ogolaato gobolka in aysan bixin caymiska dib soo u noqoshada, OHA waligeed ma isticmaalin ka dhaafitaanka. Tan darteeda iyo falcelin aad u badan, OHA waxa ay go'aansatay in aysan dabagelin dib u cusboonaysiinta ka dhaafitaankan muddada dheer soo jiray oo waxayna ka saartay codsiga dib u cusboonaysiinta ka dhaafitaanka hadda jira.</p>

4. Dariiqa SNAP ee loogu talagalay diiwaangelinta degdega ah

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	<p>Soo koobida: Faallooyinka ay bixiyaan xubnaha iyo u doodayaasha iyo bixiyeyaasha aan CCO ahayn ayaa taageera u ahaa dariiqa SNAP ee lagu soo jeediyay ka dhaafitaanka dhexdiisa. Faallooyinka qaar waxay taabteen arrimo la xiriira SNAP kuwaas oo ka baxsana xadka ka dhaafitaanka iyo/ama OHA.</p>	
6.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Xubnaha OHP iyo U doodayaasha</p> <p>Soo koobida Faallooyinka: Waxay ka dhimeysaa culayska saraan qoyska iyo carruurta waxayna yarayn kartaa kharashaadka maamulka ee ku aadan gobolka U doodaha xubinta waxa uu codsaday hannaanada la xiriira u qalmitaanka faa'iidooyinka SNAP kuwaas oo ka baxsanaa xadka ka dhaafitaanka</p>	<p>Jawaabta</p> <p>OHA waxay ka mahadcelineysaa taageerada ku aadan siyaasadan. Iyada oo wada hadallo lala yeelanayo CMS, OHA waxay go'aamisay in ka dhaafitaanka uusan ahayn dariiqa ku habboon siyaasadan wakhti xaadirkan oo ayna ka saarayso codsiga ka-dhaafitaanka. OHA waxa ay kala sahmineysaa xulashooyinka CMS si ay tan u dabagasho iyada oo u mareyso siyaasada Wax ka badelka Qorshaha Gobolka (SPA).</p>
7.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: CCO, Isbitaalka, iyo Wakiilada Nidaamka Caafimaadka</p> <p>Soo koobida Faallooyinka: Taageerada guud ee loogu talagalay waddada SNAP si dad badan caymis loogu helo</p>	

5. Go'aamiyaasha bulshada ee caafimaadka (SDOH) waxay taageero siiyaan xubnaha la kulmaaya kala guurada

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	<p>Soo koobida: Faallooyinka waxay ahaayeen kuwa taageerayey xalalka ka dhaafitaanka ee la soo jeediyay. Faalo-bixiyeyaasha ka socda CCOs iyo bixiyeyaasha kale waxay codsadeen OHA inay ka warqabto walaacyada hawleed ee la xiriira isbadeladan iyo in ka qaybqaadashada ballaaran ee iskaashatada uu ku wargeliyo dedaallada qorshaynta. Codsiga loogu talagalay taageerada internetka ee xirmada kala guurada SDOH ee cimilada ayaa mar hore lagu daray iyada oo lagu salaynayo codsiga Qabiilka sidaa darteed si wax isbadelo dheeraad si aan loogu baahan.</p>	
8.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Xubnaha OHP iyo U doodayaasha</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Muujinta taageerada ka mid noqoshada helitaanka SDOH ee ku aadan taageerooyinka dadyowga aad u nugul ee u guuraaya ka qaybgalka nidaamyada badan iyo dhibaataada. • U doodayaasha xubinta waxay codsanayaan taageerada xirmada internetka ee ku aadan kala guurka SDOH ee cimilada • Taageerada ku aadan fududaynta iyo sii wadida ee lagu codsanayo u qalmitaanka Medicaid. 	<p>Jawaabta:</p> <p>Faallooyinkaan waxaa loo isticmaali doonaa in lagu wargeliyo qorsheynta fulinta ee ku aadan xirmooyinkan taageerada. Codsiga dib u cusboonaysiinta ka dhaafitaanka waa la cusboonaysiiyay si loogu daro</p>

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
9.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: CCO, Isbitaalka, iyo Wakiilada Nidaamka Caafimaadka</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> Waxaa jiray taageero ka timid CCO-yada ee loogu danlaha siyaasadda laakiin walaaca ku saabsan awoodda xoogga shaqada ee ku aadan shaqadan iyo maalgelin joogto ah. Talada ah in OHA ay iskaashi la sameyso hay'adaha iskaashatada ee habboon Codsashada macluumaad dheeraad ee ku saabsan qalabka qiimaynta ee loo isticmaali doono si loo go'aamiyo in shakhsiga uu halis ugu jiro dhibaato hoy la'aan 	<p>taageerooyinka intarneedka ee ku aadan xirmada taageerada cimilada taas oo ka dhalatay falcelintan iyo iyadoo la raacayo codsiga Qabiilada ku jira Wadatashiga Qabaa'ilka iyo Shirweynaha Hindida Magaalooyinka Maalgelinta dawladda dhexe ayaa la codsanayaa si ay u taageerto shaqadan arrimo badan oo la xiriira xoogga shaqada ayaa lagu tixgalinayaa kulanka sharci dejinta ee Oregon.</p>
10.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Bixiyeyaasha aan CCO ahayn iyo ururada u doodista siyaasadeed</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> Muujiinta taageerada ka mid noqoshada helitaanka SDOH ee ku aadan taageerooyinka dadyowga aad u nugul ee u guuraaya ka qaybgalka nidaamyada badan iyo dhibaataada. Taageerada ku aadan fududaynta iyo sii wadida ee lagu codsanayo u qalmitaanka Medicaid. Taageerada loo muujiyey caafimaadka bulshada ee la xiriira wax ka qabashada bulshada iyo baahiyaha shakhsiyeed ee dhibaataada cimilada. Taageerada loogu talagalay helitaanka Medicaid ee ku aadan dhalinyarada ku jirta xarumaha lagu asluubta dhalinyarada iyo shaqsiyaadka xabsiga loo taxaabay Taageerada ku aadan go'aan qaadashada ay bulshada hogaamineyso. Codsiga ka yimid CBO-da adeega bixisa in hawlaha wacyigelinta iyo ka qaybgalka lagu daro adeegga taageerada kala guurka ee SDOH ee la oggolaan karo. Codso in lagu daro la-hawlgalayaasha u qalma caafimaadka dhimirka (QMHA) sidii adeeg bixiye ahaan si ay u caawiyaan inta lagu jiro kala guurka. 	

6. Adeegyada la daboolay

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
<p>Soo koobida: Walaacyada la soo jeediyeye ee la xiriira qorshaynta fulinta iyo tixgelinta waxa lagu gaaraayo meel ka baxsan ka dhaafitaanka iyada oo loo maraayo SPA, qandaraas, ama sharci-dejin.</p>		
11.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Xubnaha OHP iyo U doodayaasha</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> Codso in lagu daro qodobka xaqiijinaya ilaalinta loogu talagalay dadka naafada ah kuwa muujiya rabitaanka inay isku dhibaateeyaan ama isku dilaan goobta caafimaadka, xitaa marka ay u qalmaan 	<p>Jawaabta:</p> <p>Waanu ka mahadcelineynaa falcelintan waxaan u tixgelin doonaa qorsheynta fulinta.</p>

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	<p>daawooyinka halista ah ee sida waafaqsan "Xeerka Sharafta leh ee Dhimashada" ee Oregon.</p> <ul style="list-style-type: none"> Codso badelka qaababka lacag-bixinta ee ku saabsan caafimaadka habdhaqanka carruurta, gaar ahaan: <ul style="list-style-type: none"> Maalgeli daryeelka bulshada ku salaysan isku xiraaya qoysaska ku leh adeegyada gurigooda, bulshada, ama dugsi Bixi daryeelka wargelinta dhaawaca Ku dar maalgelinta la kordhiyay iyo siyaasadaha si wax looga qabto caqabadaha xoogga shaqada 	<p>Wax isbeddel ah looma baahna codsiga ka-dhaaftaanka natiijada falcelintan.</p> <p>Faallooyinka ku saabsan caafimaadka dabecadda carruurta waxaa loo tixgelin doonaa in lagu wargeliyo qorsheynta hirgelinta CYSHCN iyo kobcinta dadka dhalinyarada ah. Maalgelinta taageerada kaabayaasha ee ururada bulshada ku salaysan (CBOs) ayaa loo isticmaali karaa in lagu caawiyo ururada si ay u soo dallacaan Medicaid adeegyadeeda.</p>
12.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: CCO, Isbitaalka, iyo Wakiilada Nidaamka Caafimaadka</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> Sii wad caymiska OHP ee shakhsiyaadka la xidh-xidhay ee helaya Daaweynta Caawinta Daawaynta (MAT). Daboolida hoos u dhaca adeegyada caafimaadka dabecadda sida Medicaid oo ah adeegga daboosho ee adeegyada baxnaaninta dhimirka. 	

7. Nidaamka cadaalada dhalinyarada

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
13.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Iskaashatooyinka Dowladda</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> Talada in lagu daro kelmada "xarunta asluubta dhalinyarada deegaanka" ee qaybaha sharaxaya u qalmitaanka iyo faa'iidooyinka Maamulka Dhallinyarada Oregon (OYA) ayaa bixiyay faallo qoraal ah oo waxay ku hawlan yihiin wada hadal la taaban karo oo ay la yeesheen Maamulka Caafimaadka Oregon waxayna sheegeen walaacyada soo socda: <ul style="list-style-type: none"> Culayska maamulka: OYA ma laha kaabayaal ay ku dalacdo Medicaid ee ku aadan adeegyada ay bixiyaan bixiyayaasha daryeelka caafimaadka shaqaalaha OYA. OYA ma laha awood ku filan oo ay kula gorgortanto oo ay ku ilaaliso heshiisyada ay la leedahay CCOs ee ku aadan bixiyayaasha daryeelka caafimaadka shaqaalaha OYA. Xayiraada saaran adeegyada daryeelka caafimaadka: OYA waxa ay bixisa adeegyo ka sii xoog badan baaxad ahaan marka loo eego caymiska Medicaid oo u ogolaanaayo iyada oo lagu salaynayo Liiska Mudnaanta la siiyay ee HERC. Helitaanka adeegyada: OYA waxay xustay dhowr tusaale oo ay bixiyayaasha ay isticmaalaan ee ka baxsan xaruntooda aysan qaadanin Medicaid gabi ahaanba ama aysan ku bixin doonin adeegyada sicirada Medicaid. Tani waxay u 	<p>Jawaabta:</p> <p>Iyada oo ku saleysan falcelinta ka timid hay'adaha dowladda ee deegaanka iyo gobolka, gaar ahaan wadhadalka ballaaran ee lala yeeshay Maamulka Dhallinyarada Oregon, OHA waxay wax ka badeli doontaa soo jeedinta ka dhaaftaanka ee dhallinta ka tirsan OYA ee goobaha asluubta ku xiran si ay u codsato u qalmitaanka Medicaid xaddidan ee diiwaangelinta CCO ee xaddidan xirmada faa'iidada adeegyada kala guurka. Codsiga xirmada faa'iidada ee loogu talagalay dhalinyarada ku jirta xarumaha asluubta dhallinyarada deegaanka waxba lagama badeli doono.</p>

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	<p>muuqataa mid gaar ah oo heer gobol ah iyo bixiyaha takhasuska leh, in kasta oo aysan ahayn arrin go'doonsan (tusaalooyin badan).</p> <ul style="list-style-type: none"> ○ Isku duwida CCOs: OYA waxay soo xigatay walaacyada ku saabsan daahitaanka diiwaangelinta CCO, saadaalinta la'aanta meelaynta juqraafiyeed ee dhalinyarada ee u diyaargarowga siideynta taasoo keeneyso xaddid/qorshe hore la'aan iyada oo laga helaayo CCO-yada iyo helitaanka xiga ee arrimaha daryeelka ka dib markay ka baxaan magantooda (sida, helista ama isku duwida ballamaha, farmashiyaha, iwm.). ○ Adeegyada kala guurka (xirmada faa'iidada SDOH): Shaqaalaha OYA ayaa aad u taageersan xirmada adeegyada kala guurka, iyo jadwal-waqtiyeedka la dheereeyay ee dhalinyarada ay magantooda ku jiraan waxaa lagu taageeri karaa ka guuritaankooda sidii ay ugu soo laaban lahaayeen bulshada. 	

8. Iskaashiyada Maalgelinta Bulshada

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
<p>Soo koobida: Xubnaha bulshada ayaa taageero weyn u muujiyey soo jeedinta. CCO-yadu waxay muujiyeen walaacyada ku saabsan qaab-dhismeedka maamulka la soo jeediyay, doorka ay ku leeyihiin, iyo xiriirka ay la leeyihiin (Guriga Sharciga Oregon) Oregon House Bill 3353 (2021) sidii loogu talagalay.</p>		
14.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Xubnaha OHP iyo U doodayaasha</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Mudnaanta sii hay'adaha ku salaysan bulshada kana fogow isbadbadelka • Taageerada ku aadan soo jeedinta CIC, mabaadi'da HB 3353 • Taageero xoog leh oo loogu talagalay balaarinta maalgashiyada ay bulshadu hogaaminayso • Qiimaha iskaashatada ka dhexeeya horumarinta bulshada iyo daryeelka caafimaadka • Waxaa uu wax ka qabtaa kala duwanaanshaha caafimaadka ee gobolka • Wareejinta awooda iyo agabyada 	<p>Jawaabta:</p> <p>Maamulka Caafimaadka Oregon waxay u mahadcelinaysaa taageerada xooggan ee soo jeedinta xubnaha iyo u doodayaasha waxayna ka mahadcelinayaan walaacyada ka imaanaya CCO-yada iyo kuwa kale ee ku saabsan hawlgelinta soo jeedintan. OHA waxay caddayn doontaa codsiga si ay u muujiso ulajeedka Iskaashatada Maalgelinta Bulshada ee gobolka (CICs) waa in laga faa'iidaysto midka hadda jira, hay'ado ay bulshadu hogaamiso oo ku wareejinaayo awood iyo agabyo dheeraad ah hay'adahan. OHA waxay sidoo kale caddayn doontaa codsiga 3% kharashgareynta CCO sida uu tilmaamayo HB 3353 si</p>
15.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Bixiyeyaasha aan CCO ahayn</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Taageerada guud oo xooga la saarayo suurtagalnimada isticmaalka horumarinta deegaanka ee CBO-da adeeg gaarsiinta 	
16.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: CCO iyo Nidaamka Caafimaadka</p> <p>Soo koobida Faallooyinka: Taageerada loogu talagalay:</p>	

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	<ul style="list-style-type: none"> Oo ay ku jirto 3% maalgelinta kor u kaca oo qayb ka ah kharashyada caafimaadka Dabacsanaanta si loo sameeyo maalgashi sare; taageer ujeedo oo muuji rabitaan ah in la qabto shaqadan <p>Walaaca:</p> <ul style="list-style-type: none"> Soo jeedinta nidaamka qaabdhismeedka maalgelinta Hufnaan la'aanta ku saabsan xiriirka CHPs, Qorshayaasha Sinnaanta Caafimaadka, Qorshayaasha BH oo dhamaystiran, iyo qabanqaabada maaliyadeed ee CCO Rumaynta in sida la soo jeediyay, ay ka soo horjeedo ujeeddada HB 3353 Juqraafiga iyo qaabdhismeedka maalgelinta ee CICs iyo doorarka dadka lagu daray Guddiyada Kormeerka iyo CICs. Walaaca iyo su'aalaha ku saabsan caddaynta doorarka gobolka ee Guddiga kormeerka iyo CICs Maalgelinta kor u kaca ee walaaca hadda lama "tirin" karo taas badelkeedana waxaa lagu tiriyaa sidii kharashyo maamul 	<p>loogu tiriyo kharash caafimaad ahaan. Talooyinka kale waa la tixgelin doonaa iyada oo la horumarinayo soo jeedinta qorshaynta fulinta dheeraadka ah.</p>
17.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: U oolaleeyayaasha ama u doodayaasha siyaasada</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> Hal codsi ayaa la sameeyay si loo dammaanad qaado doorarka saraakiisha caafimaadka bulshada ee CIC ee aag kasta oo adeeg ah. 	

9. Qabaa'ilka iyo Adeegyada Qabaa'ilka ee Federaalka aqoonsan yahay

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
18.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Xubnaha iyo U doodayaasha</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> Su'aal ku saabsan haddii ay jiraan dadaallo lagu doonayo in lagu soo daro kuwa loo aqoonsaday inay yihiin qabiil laakiin aan ka tirsanayn qabiilka federaalku aqoonsan yahay 	<p>Jawaabta:</p> <p>Adeegyada Medicaid, Maamulka Caafimaadka Oregon wuxuu raacayaa qeexidda xarumaha federaalka ee Medicare iyo Adeegyada Medicaid ee Hindida Ameerikaanka/ Dhaladka Alaska ee 42 CFR § 447.51. Qeexitaan waxaa ka mid ah shaqsiyaadka loo aqoonsaday inay yihiin qabiil, iyadoo lagu salaynayo faraca iyo/ama u-qalmitaanka adeegyada IHS, laakiin aan ka diiwaan gashanayn xubnaha qabiilka federaalku aqoonsan yahay. Oregon waxa ay ilaalisaa xiriirka dawlad iyo dawladeed ee sagaalka qabiil ee federaalku aqoonsan yahay ee gobolka, qaybta mudnaanta qabiilka waxaa la sameeyay iyada oo lala kaashanayo wakiilada qabaa'ilka Oregon.</p> <p>Fiiro gaar ah: Hannaanka Wadatashiga Qabaa'ilka iyo Habka Wadatashiga Caafimaadka Hindida Magaalada waxa loo diiwaangaliyay si ka gooni ah faallada dadwaynaha ee la helay.</p>

10. Dhaqaalaha iyo sicirada

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
19.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: CCO, Isbitaalka, iyo Wakiilada Nidaamka Caafimaadka</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> Walaac ka muujiyay la'aanta dib-u-habaynta sicirka sannadlaha ah oo ay rabeen inay hubiyaan in isbeddel kasta oo lagu sameeyo horumarka heerka ay weli dhab ahaantii sax yihiin. 	<p>Jawaabta</p> <p>OHA waxay ka mahadcelinaysaa walaaca ku saabsan qiimayaasha dhabta ah waxayna la shaqayn doontaa la-hawlgalayaasha federaalka si loo hubiyo in isbeddel kasta oo si ku filan ah uu u muujiyo khatarta maaliyadeed.</p>

11. Qorshaha qiimaynta

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
<p>Soo koobida: CCO waxay muujisay faallooyinka ku saabsan adeegsiga xog-uurin qorshaha qiimaynta iyo walaaca ku saabsan adeegsiga maalgashiga Adeegyada La Xiriira Caafimaadka (HRS) si loo tijaabiyo fikradaha la soo jeediyay.</p>		
20.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: CCO, Isbitaalka, iyo Wakiilada Nidaamka Caafimaadka</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> Walaac ka muujiyay xog-uruurinta bulshada si loo qiimeeyo bandhigga, gaar ahaan habka maalgelinta ee loogu talagalay dadaalkan Codsaday in Maalgelinta Adeegyada La xiriira Caafimaadka (HRS) aysan noqon hab lagu tijaabiyo mala awaalka ku saabsan dib u qaybinta awoodda iyo agabyada 	<p>Jawaabta:</p> <p>OHA way ka mahadcelinaysaa falcelintan oo faahfaahinta buuxda ee qorshaha qiimaynta waxa lala samayn doonaa iskaashatada federaalka ansixinta bandhiga ka dib.</p>

12. Socdaalka iyo waddanimada

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
<p>Soo koobida: OHA waxay heshay taageero xooggan oo loogu talagalay Barnaamijka Caafimaadka Oregon iyo dhowr talooyin oo ku saabsan sidii loo horumarin lahaa khibrada xubinta iyada oo aan loo eegin socdaalka ama xaalada waddanimada.</p>		
21.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Xubnaha iyo U doodayaasha</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> Waxa loo muujiyay taageero xooggan Barnaamijka Caafimaadka Oregon (oo hore loogu yiqiin Caymisk Dhammaan Dadka iyo Caymiska dhammaan Ilmaha) si loo daboolo shakhsiyaadka iyada oo aan loo eegin xaalada socdaalka. Codsiga lagu daboolayo kharashaadka adeegyada sharciga socdaalka ee ay bixiyaan xubnaha OHP, oo ay ku jiraan dadka 	<p>Jawaabta</p> <p>OHA waxay u mahadcelineysaa taageerada Barnaamijka Caafimaadka Oregon. Waqtigan xadirka ah, xeeladaha la xiriira daboolida shaqsiyaadka iyadoon loo eegin heerka socdaalka ayaa</p>

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	<p>haysta kaarka cagaaran, qaxootiga, dadka magangalyo doonka ah iyo kuwa haysta fiisaha bini'aadantinimada sababtoo ah qiimaha adeegyada sharciga socdaalka ayaa noqon kara mamnuuc dad badan oo reer Oregon ah oo ku nool ama ka hooseeya heerka faqriga.</p> <ul style="list-style-type: none"> • Codso taageerada shakhsiyadka aan sharciga lahayn ee OHP ee ka weyn da'da 65 • Codso in la tixgeliyo qoysaska leh xaaladaha socdaalka ee isku dhafan marka la samaynayo go'aannada u qalmitaanka • Baahida loo fududeeyo helida caymiska caafimaadka iyo ilkaha kuwa aan sharciga haysan, gaar ahaan carruurta naafada ah • In la raaco nidaamka khidmada-loogu talagalay-adeegga ama "kaarka furan" ayaa si gaar ah ugu adag soogalootiga 	<p>ka baxsan baaxadda dadaallada siyaasadeed ee ka tanaasulka ee hadda. Waxaan u gudbinay faallooyinkan kooxda Barnaamijka Caafimaadka Oregon si loo tixgeliyo hirgelinta waxaan tixgelin doonaa sida loo isticmaalo faallooyinkan si loo sameeyo hagaajinta hawlgalka ee OHP dhammaan xubnaha iyada oo aan loo eegin socdaalka ama heerka dhalashada.</p>
22.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: CCO, Isbitaalka, iyo Wakiilada Nidaamka Caafimaadka iyo Daryeelka Caafimaadka, Ururka Bulshada, iyo Bixiyayaasha Adeegga Bulshada</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Taageero xooggan loo muujiyey Barnaamijka Caafimaadka Oregon (oo hore loogu yiqiin Dabool Dhammaan Dadka iyo Dabool Dhammaan Carruurta) si loo daboolo shakhsiyadka iyada oo aan loo eegin heerka socdaalka. 	

13. Xogta Jinsiga, Qoomiyada, Luuqadda, iyo Naafanimada (REALD) iyo Nooca Galmada iyo Aqoonsiga Jinsiga (SOGI)

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
23.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: CCO, Isbitaalka, iyo Wakiilada Nidaamka Caafimaadka</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Waxay ku dhiirigelisay OHA inay hubiso ururinta saxda ah ee joogtada ah ee xogta REALD marka la qorsheynayo hawlgelinta cabbirada sinnaanta caafimaadka • Waxa laga digay in xog ururinta REALD ay culays saari karto bixiyayaasha iyo iskaashtada bulshada, gaar ahaan qaybaha kala duwan ee nidaamka caafimaadka oo ururinaya macluumaadka 	<p>Jawaabta:</p> <p>OHA waxay ogolaatay inay lama huraan tahay in la ururiyo xog joogto ah oo sax ah oo ku saabsan jinsiyadda xubinta ka ah, qowmiyadda, da'da, luqadda iyo naafanimada (REALD), iyo sidoo kale nooca galmada iyo aqoonsiga jinsiga (SOGI) ee bixiyayaasha safka hore iyo CCOs si loo qiimeeyo saameynta ee isbeddelka siyaasadda ee dhimista sinnaan la'aanta caafimaadka. Tani waxay si gaar ah muhiim ugu noqon doontaa hawlgelinta cabbirada dhiirigelinta sinnaanta caafimaadka iyo qiimaynta natiijada bandhigga.</p>

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
24.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Sharci-dejiyayaal / Siyaasad-sameeyayaal, u ololeeyayaasha Siyaasada /Kooxaha Danaha Gaarka ah</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> Balaarinta kaabayaasha si loogu ogolaado CBOs inay soo gudbiyaan xogta marka ay bixinayaan adeegyada waxay caqabado u abuuri doontaa ururada yaryar ee leh maalgelinta maamul ee xadidan. Soo jeedinta in shuruudo kastaa ay xaqiijiyaan in biilasha adeegyada bulshadu ay tahay mid fudud oo hufan intii suurtagal ah Talo soo jeedin ah in la eego FQHCs si loo fahmo maadaama ay inta badan safka hore kaga jireen tijaabinta sida loo ururiyo loogana faa'iidaysto xogta muujinaysa baahida bukaanka ee aan caafimaad ahayn 	<p>OHA waxay qadarinaysaa in xog ururintu ay caqabado u keeni karto ururada yaryar sida ururada bulshada waxayna noqon kartaa mid si gaar ah u adag waxayna noqon doontaa tixgalin qorshaynta shuruudo kasta oo mustaqbalka ah.</p>

14. Farmashiyaha

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	<p>Soo koobida: Walaaca ah in qaacidada xiran ay xaddidi doonto bixiyayaasha awoodda ay u leeyihiin in ay go'aano caafimaad u gaaraan daryeelka bukaankooda oo ay si xun u saameeyaan helitaanka daawooyinka loo qoro dadka qaba baahiyaha habdhaqanka iyo caafimaadka maskaxda, naafanimada, iyo xaaladaha kale ee muddada dheer</p> <p>Walaaca ah in xaddididda helitaanka daawooyinka lagu oggolaaday hannaanka oggolaanshaha degdegga ah ee FDA ay ku saleysan tahay fahamka aan saxda ahayn ee dariiqa oggolaanshaha degdegga ah ee FDA iyo haddii la hirgeliyo waxay dhibaato weyn u geysaneysaa dadka qaba cudurada naadirka ah.</p>	
25.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Xubnaha OHP iyo U doodayaasha</p> <p>Soo koobida Faallooyinka: Qaacidada xiran (Walaacyada)</p> <ul style="list-style-type: none"> Nidaamyada racfaanku waxay lagama maarmaan u noqon doonaan helitaanka daawooyinka aan kharashka badnayn Saamaynta xun ee suurtagalka ee ay ku yeelan karto dadka qaba cudurada naadirka ah, HIV, iyo kansar Waxay xadidaysaa awooda bixiyayaasha si ay go'aano caafimaad u gaaraan Suurtagal ah inay keento natiijooyin taban oo aan loo simanayn oo loogu talagalay dadka midabka leh ama kuwa taariikh ahaan danyarta ah, Khilaafida suurtagal ah ee ku aadan sharciyada dowlada dhexe ee xukuma barnaamijka Dhimista daroogada ee Medicaid (MDR). 	<p>Jawaabta:</p> <p>Codsiga qabya-qoraalka ah waxa ku jiray laba soo jeedin oo la xiriira farmasiga. Hal waxay ahayd in la ogolaado OHA iyo CCOs inay ku shaqeeyaan qaacidada xiran. Tan labaad waxay ahayd in loo oggolaado OHA inay ka saarto daawooyinka qaarkood ee aan haysan caddayn ku filan oo waxtar leh. Iyada oo ku saleysan falcelinta la helay, OHA waxa ay codsiga u</p>

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	<p>Helitaanka xaddidan ee Daawooyinka Oggolaanshaha Degdegga ah (Walaacyada)</p> <ul style="list-style-type: none"> • Waxyeelada loo geysto bukaannada iyada oo la xaddidayo helitaanka daawaynta cusub iyo naf-badbaadinta <ul style="list-style-type: none"> ◦ Cadaynta soo jeedintu waxay wiiqaysaa habka sayniska ee FDA si loo go'aamiyo badqabka daroogada iyo waxtarka waxayna niyad jabineysaa soo saarista daawada cudurada dhifka ah. 	<p>dambeeya ka saaraysaa qaacidada xiran OHA waxa ay ogolaansho ka codsanaysaa CMS si ay ugu ogolaato ka saarida dawooyinka ogolaanshaha degdega ah ee leh caddayn xadidan ama aan ku filnayn oo waxtarka caafimaad</p>
26.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: CCO, Isbitaalka, iyo Wakiilada Nidaamka Caafimaadka</p> <p>Soo koobida Faallooyinka: Qaacidada xiran (Walaacyada)</p> <ul style="list-style-type: none"> • Yaraynta doorka sharciga ee FDA • Khilaafida barnaamijka dhimista daawooyinka Medicaid ee federaalka (MDR). • Isticmaalka loo baahan yahay ee qaacidada xiran ayaa si aad ah u kordhin doonta kharashyada iyada oo carqaladaynaysa waxtarka ka jira nidaamyada caafimaadka isku dhafan <p>Helitaanka xaddidan ee Daawooyinka Oggolaanshaha Degdegga ah (Walaacyada)</p> <ul style="list-style-type: none"> • OHA waxay muujisay shakiga laga qabo faa'iidooyinka caafimaad ee daawooyinka lagu ansixiyay iyada oo loo marayo dariiqa la dedejiyay, taas oo ka tarjumaysa eex xoogan iyo walaac OHA ma samayn doonto dib u eegis la mid ah sida FDA ee hannaanka oggolaanshaha. 	
27.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Daryeelka Caafimaadka, Ururka Bulshada, iyo Bixiyeyaasha Adeegga Bulshada</p> <p>Soo koobida Faallooyinka: Qaacidada xiran (Walaacyada)</p> <ul style="list-style-type: none"> • Suurtagalnimada dhibaatooyinka dhimirka, oo ay ku jiraan dadweynaha SPMI, walaacyada ku saabsan culeyska saaran bixiyeyaasha warqadaha iyo xafiis madaxda ee oggolaanshaha hore oo waqti ka qaadaneyso daryeelka bukaanka iyo dib u dhigista helitaanka taasoo horseedi karta natiijooyin taban iyo kor u kaca kharashyada nidaamka oo ay ku jiraan isbitaal dhigista. 	
28.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Sharci-dejiyayaal / Siyaasad-sameeyayaal, u ololeeyayaasha Siyaasada /Kooxaha Danaha Gaarka ah</p> <p>Soo koobida Faallooyinka: Qaacidada xiran (Walaacyada)</p> <ul style="list-style-type: none"> • Si toos ah u khilaafida barnaamijka dhimista daawooyinka Medicaid (MDR) iyo sharciga dowlada dhexe 	

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	<ul style="list-style-type: none"> Qaabka waxa uu dhaawici karaa ka faa'iidaystayaasha Medicaid waxana uu xaddidi karaa helitaanka dawooyinka badbaadinta nafta taasoo horseedeyso natiijooyin taban Kala badbedelitaanka daawooyinka suuxdinta Qaabku waxaa uu ka hor imanayaa hadafka OHA ee sinnaanta caafimaadka waxaa uuna ku sii dari doonaa sinnaan la'aanta caafimaadka Suugaanta la soo wariyey ee muujineyso xaddidida qaacidooyinka la isku qurxiyo waxay la xiriirtaa natiijooyinka u hoggaansanaanta daawada liidata. <p>Helitaanka xaddidan ee Daawooyinka Oggolaanshaha Degdegga ah (Walaacyada)</p> <ul style="list-style-type: none"> OHA waxaa ka maqan faham sax ah oo ku aadan hannaanka oggolaanshaha daawada FDA iyo halbeegyada caddaynta u ah Bukaanada qaba baahiyo caafimaad oo halis ah oo aan la daboolin waxay u badan tahay inay waxyeello u geysan doonto hindisahan <ul style="list-style-type: none"> Haddii dawooyinka cusub ee cudurada naadirka ah aysan daboolin Medicaid, tani waxay yaraynaysaa hal abuurka iyo soo saarista daawaynta cusub 	

15. Liiska Mudnaanta iyo isticmaalka Sannadaha Nolosha La Habeeyay ee Tayada (QALYs)

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	<p>Soo koobida: U doodayaasha iyo xubnaha iyo qaar ka mid ah bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ayaa walaac ka muujiyay isticmaalka QALY-yada ee Liiska Mudnaanta la siiyay inay yihiin midabtakoor ka dhan ah dadka naafada ah. U doodayaasha ayaa sidoo kale soo jeediyey walaacyo ku saabsan Liiska Mudnaanta la siiyay inuu horseedaayo dafirida daryeelka.</p>	
29.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Xubnaha OHP iyo U doodayaasha</p> <p>Soo koobida Faallooyinka: Walaacyada ku saabsan QALYs:</p> <ul style="list-style-type: none"> Ka soo horjeedsashada isticmaalka QALY-yada si loo go'aamiyo waxa ay yihiin shuruudaha lagu dabooli doono ama aan lagu dabooli doonin Barnaamijka Medicaid ee Oregon Walaaca in dhibcaha QALY ay yihiin kuwa si dabiici ah ugu saleysan midabtakoor, oo dul dhigaaya qiima aan sabab lahayn nolosha dadka naafada ah, bukaanada, dadka waaweyn iyo dadka midabka leh sababa la xiriira kala duwanaanshaha ka jira ee daryeelka caafimaadka Walaaca in Guddiga Dib u Eegista Caddeynta Caafimaadka (HERC) ay isticmaasho warbixinada wax ku ool ah ee kharashka kuwaas oo isticmaala soona 	<p>Jawaabta:</p> <p>OHA waxa ay fahansan tahay in u doodayaashu ay qabaan walaacyo ah in isticmaalka qaar ka mid ah isticmaalka sanadaha nolosha ee tayada la isku hagaajiyay (QALY's) laga yaabo in ay abuuraan ama ka sii daraan kala duwanaanshiyaha caymiska dadka naafada ah. OHA iyo Guddiga Dib u eegista Caddeynta Caafimaadka (HERC) waxay walaacyadan u qaataan si dhab ah waxayna ka shaqeeyaan sidii ay xubnaha OHP u heli lahaayeen daaweyn iyo adeegyo siman.</p>

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	<p>jeedinaya dareenka dhibcaha QALY iyo fikrado kale oo si dhow ugu eg QALYs</p> <ul style="list-style-type: none"> • Walaaca in isticmaalka QALY-yada ay xadgudub ku yihiin Xeerka Naafada Maraykanka (ADA) kana soo horjeeda hadafka OHA ee lagu hormarinaayo sinnaanta caafimaadka. <ul style="list-style-type: none"> ○ Xigashooyinka isbadelada lagu sameeyay codsiga ka dhaafitaanka 1992 ee sanadkii 1993 inay noqdaan kuwa aan u hoggaansaneyn ADA • Codso gorgortan qoondaynta agabyada OHA oo ay weheliso u doodayaasha xuquuqyada naafada si loo horumariyo sinnaanta • Codso ku darista qodobkan soo socda codsiga ka dhaafitaanka <ul style="list-style-type: none"> ○ "Mamnuucida Ku tiirsanaanta Tallaabooyinka Midabtakoorka. Dawladda waa in aanay si toos ah ama si dadban uga faa'iidayaan, gabi ahaan ama qayb ahaan, iyada oo loo marayo hay'ado qandaraas leh ama dhinac kale oo saddexaad, sanad nololeedka lagu hagaajiyey tayada dollar kasta ama tallaabo kasta oo la mid ah ama cilmi baaris lagu ogaanayo in daawaynta daryeelka caafimaadka gaar ah ay tahay mid kharash ku ool ah, lagu taliyay, qiimaha daawaynta, ama go'aaminta caymiska, lacag celinta, qadarka lacag bixinta saxda ah, kharash wadaagida, ama siyaasadaha dhiiragelinta ama barnaamijyada." <p>Walaacyada ku saabsan Liiska Mudnaanta la siiyay:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Bayaanka in Liiska Mudnaanta la siiyey uu ka shaqeeyo qaybinta adeegyada daryeelka caafimaadka qaatayaasha Medicaid ee Oregon • Walaaca in Liiska Mudnaanta la siiyey uu yahay mid aan dabacsaneyn marka loo eego baahida caafimaad iyo ku habboonaanta caafimaadka sida caafimaad ahaan u habboon iyo adeegyada lagama maarmaanka ah si joogto ah loo dafiro. • Walaaca in kuwa qaba xaalad ka sarreysa xariiqda caymiska ee ku qoran liiska ayaa weli laga tahay iyaga oo aan helin daaweyn ku filan sababtoo ah daaweyntooda kuma xirna xaaladdooda. • Codso in ka dhaafitaanka 1115 wax laga badeelo "si loogu daro tilmaamo gaar ah oo u baahan oggolaanshaha caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah, daryeelka caafimaad ahaan habboon ee loogu talagalay isdiiwaangeliyaasha OHP haddii xaaladahooda gaarka ah ee isku darka ah ay u baahan yihiin daaweyn aan si 	<p>QALYs waxay hadda door yar ka ciyaaraan go'aamada Guddiga Dib u eegista Caddeynta Caafimaadka, badanaa marka la barbardhigo laba daawaynta oo isku mid ah. OHA ma rumaysna in loo isticmaalo in lagu midabtakoorko dadka naafadanimada qaba. Inta badan, daaweyn kharash-oolka badan ayaa laga yaabaa in laga doorbido mar loo eego mid kharash-oolka yar. Waqtiyada kale, tijaabada daawaynta qiimaha hoose waa in la isku dayaa ka hor inta aan la isticmaalin adeeg ka qaalisan. Iyada oo aan loo eegin, qiyaas kasta oo QALY's ah ayaa kaliya hal tixgalin ka mid ah kuwa badan marka loo eego qiimaynta wax-ku-oolnimada.</p> <p>Liiska Mudnaanta waxaa soo saaray Guddiga Dib u Eegista Caddeynta Caafimaadka iyada oo la adeegsanayo hannaan dadweyne oo hufan, iyadaoo lagu tabaqaayo caddaynta caafimaadka iyada oo la tixgalinayo qiyamka iyo dookhyada bixiyayaasha iyo xubnaha.</p> <p>Haddii ay jiraan walaacyo ku saabsan caymis la'aanta adeegyada gaarka ah, Guddiga waxaa tixgelin doonaa dib u habeynta, ku darida gobolka la maalgeliyay, ama isbadelada qoraallada hagitaanka. Taa beddelkeeda, xubnaha dadweynaha waxay soo jeedin karaan mawduuc dib u eegis lagu sameeyo inta lagu guda jiro xilliga faallooyinka dadweynaha taasoo qayb ka ah shirarka HERC.</p>

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	dhammaystiran u waafaqsaneyn Liiska Mudnaanta la siiyey ee isku xirnaanta xaalada/daaweynta”	
30.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: CCO, Isbitaalka, iyo Wakiilada Nidaamka Caafimaadka</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> Codso in ka dhaaftaanka ay ku jirto qodob si cad u diidaya isticmaalka tallaabooyinka midabtakoorka ah sida QALYs 	

16. Isweydaarsiga macluumaadka bulshada (CIE) iyo tignoolajiyada macluumaadka caafimaadka (HIT)

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
31.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: CCO, Isbitaalka, iyo Wakiilada Nidaamka Caafimaadka</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> OHA waa in ay qorsheysaa wadaagista xogta adag iyo hannaanada isku duwida, iyada oo ku dhiseysa guulaha la wadaago xogta xaaladaha kale, si ay u taageerto dadka ku jira haynta nidaamka hay'adaha ee haysta faa'iidooyinka Qorshaha Caafimaadka Oregon 	<p>Jawaabta:</p> <p>OHA way fahantay oo ogolaatay muhiimada wadaaga xogta si ay u taageerto kala guurka daryeelka oo ay ku jiraan kaabayaasha loo baahan yahay in lagu taageero bixiyayaasha iyo CBO-yada.</p>
32.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Daryeelka Caafimaadka, Ururka Bulshada, iyo Bixiyayaasha Adeegga Bulshada</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> Iskuduwidda daryeelka tayada leh, oo ay ku jiraan gudbinta nidaamka daryeelka caafimaadka iyo hay'adaha adeegyada bulshada, waxay u baahan yihiin kaabayaalka Farsamada macluumaadka oo la hormariyey lana ballaariyey. OHA waa in ay taageertaa oo ay mudnaanta siisaa shaqada Guddiga Kormeerka Tignoolajiyada Macluumaadka Caafimaadka kaas oo hormarin kara khibradda xubinta iyo taageerida xooga shaqaalaha caafimaadka iyo adeegyada bulshada. 	
33.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Sharci-dejiyayaal / Siyaasad-sameeyayaal, u ololeeyayaasha Siyaasada /Kooxaha Danaha Gaarka ah</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> OHA waa inay aqoonsataa oo ay ku dartaa shaqada muhiimka ah ee lagu dhisayo laguna taageerayo Isweydaarsiga Macluumaadka Bulshada (CIE) kuwaas oo ah qalabka lagu taageerayo kormeerka daryeelka bulshada iyada oo u fududaynaysa ku xirida shakhsiyaadka agabyada bulshada ee la heli karo 	

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	<ul style="list-style-type: none"> • Si wax looga qabto baahiyaha bulsho ee la xiriira caafimaadka loona hormariyo sinnaanta caafimaadka, waxaa muhiim ah in CBO-yada si ku filan oo joogto ah loo maalgeliyo. • Codsiga ka dhaafitaanka OHA waa in uu aqoonsado muhiimada Kooxda shaqada HITOC/CIE si loo dejiyo tilmaamaha iyada oo gobolka dhisayo awooda lagu taageerayo faa'iidooyinka SDOH ee loogu talagalay dadyowga kala guurka ah iyo hormarka laga gaarayo buuxinta halbeegyada sare ee la xiriira baaritaanka SDOH iyo gudbinta • OHA waa inay tixgelisaa isku darka shaqada CIE ee ka socota Oregon iyo kuwa la soo jeediyay ee ka dhaafitaankan, oo ay ku jiraan qaab dhismeedka maamulka CIE ee jira iyo Iskaashiga Maalgashiga Bulshada; • OHA waxay dabagashaa maalgelinta u dhiganta federaalka Medicaid si ay u taageerto maalgelinta kaabayaasha CIE, waana in ay isticmaashaa fursadan Ka dhaafitaanka, oo ay weheliso fursadaha sheegasho maamul, si ay ugala xiriirto u jeedka lagu dhisayo maalgelinta joogtada ah ee CIE. • Shaqada CIE ee OHA waa inay ku jiraan: <ul style="list-style-type: none"> ○ Samee dejinta halbeegyada kaliya si aad ugu ogolaato ururinta xogta caadiga ah iyo dadaalada isku duwida daryeelka la habeeyey ee gobolka oo dhan, oo ay ku jirto la jaanqaadida CIE ee leh sharciyada REALD ○ Sameynta shuruudaha asturnaanta iyo ammaanka iyo ilaalinta asturnaanta xogta gaarka ah, iyada oo shakhsiyadka ay ilaalinayaan xakamaynta xogtooda gaarka ah. ○ Nidaamyada biilasha ee ay qaateen iyo/ama ay soo iibiyeen iyo/ama CBO-yada ka qaybqaadanaya habaynta lacag-celinta CCO-yada waa in loo arkaa inay yihiin kaabayaasha la wadaago. ○ Taageerida habraaca si xaqiiq ah loo wada shaqayn karo - OHP waxay door ka ciyaari kartaa nidaamkan iyada oo u baahan is dhexgalka iyo hormarinta halbeegyada wada shaqaynta, ○ Kobcinta shabakad furan oo diiradda saaraysa iyo siinta xubnaha fursad ay ku raadsadaan adeegyada iyaga oo isticmaalaya is hagitaan, iyada oo aan loo baahnayn inuu qof kale u sameeyo iyaga; 	

17. Baaritaanka Hore oo Wakhtiyaysan, Ogaanshaha, iyo Daaweynta (EPSDT)

Fadlan ogow, jawaabta dheer darteed, faalladan waxa loo qaabeeyey si ka duwan iyada oo jawaabta hoose soo koobida faallooyinka.

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay
	<p>Soo koobida: Dhammaan dhageystayaashii faallada ka bixiyay, OHA waxay heshay falcelin xooggan oo codsanaysa saaritaanka ka dhaafitaanka EPSDT. Xubnaha iyo u doodayaasha, CCO-yada iyo wakiilada nidaamka caafimaadka, iyo daryeelka caafimaadka, ururada bulshada ayaa soo xigtay walaacyada ku saabsan caafimaadka carruurta.</p>
34.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Xubnaha iyo U doodayaasha</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Maamulka ka dhaafitaanka waxaa uu noqon doonaa midabtakoor ka dhan ah carruurta naafada ah iyo qoysaskooda • Oregon waa gobolka kaliya ee dalka ka jira ee leh xad ku saabsan faa'iidooyinkan loogu talagalay carruurta da'doodu ay ka yar tahay 19 sano • Xaddidaada faa'iidadan waxay wiiqaysaa xudunta aasaaska waxa Oregon uu sheeganaayo in lagu sameeyo bandhigiisa—sinaanta caafimaadka hore iyo kordhinta helitaanka siman ee caymiska • OHA ma aysan sharaxin adeegyada aan la dabooli doonin iyo waxa ay yihiin ilaalinta gobolka uu u qoondeeyey si loo hubiyo in xaddidaadaha ku saabsan adeegyada EPSDT aysan saameyn kala duwan ugu lehayn carruurta midabka leh. • Soo jeedinta waxa ay meesha ka saaraysaa daawaynta loogu talagalay xanuunada ku badan carruurta naafada koriinka ah leh, oo ay ku jiraan afqabadka xulka ah, cilladaha habdhaqan iyo shucuurta, qallafsanaanta jirka sare iyo lugaha, ciladaha hurdo xumada, iyo qashin cunka • Qaar badan oo ka mid ah lamaanayaasha xaalada / daawaynta ee "ka hooseeysa xariiqda" ayaa ah kuwo daciifa laakiin la daweyn karo, diidmada caymiska waxay u horseedi kartaa waxyeelo weyn.
35.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: CCO, Isbitaalka, iyo Wakiilada Nidaamka Caafimaadka</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Ka dhaafitaanka EPSDT waxay ka reebaysaa carruurta qaba xanuunka suuxdinta adeegyada loo baahan yahay • Codso ka saarida ka dhaafitaanka EPSDT • EPSDT waxay xaqiijisaa helitaanka daryeelka caafimaadka ee loogu talagalay carruurta si la jaanqaadsan ujeeddada Congress-ka • EPSDT waxay si gaar ah muhiim ugu tahay carruurta iyo dhalinyarada leh baahiyaha daryeel caafimaad ee gaarka ah
36.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Daryeelka Caafimaadka, Ururka Bulshada, iyo Bixiyayaasha Adeegga Bulshada</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Codsiga joojinta ka dhaafitaanka caymiska EPSDT • Walaaca in EPSDT aan looga baahnayn OHA si ay u gaarto hadafyadeeda ay sheegtay ee ku aadan caafimaadka carruurta • Codso inay bixiyaan adeegyada hagaajinta ilkaha ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah si loo hormariyo sinnaanta caafimaadka • Baahida loo qabo warbixino macno buuxa leh iyo qaab dhismeedka isla xisaabtanka marka ka dhaafitaanka EPSDT meesha laga saaro • Codsiga ku aadan warbixinta xogta ee lagu habeeyey dad hoosaadka si loo hubiyo in carruurta si siman loogu adeego sida waafaqsan faa'iidadada hagaajinta ilkaha ee cusub

Jawaabta OHA

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) waxa ay u mahadcelinaysaa falcelinta cad ee bulshada, oo ay ku jiraan u doodayaasha, ururada adeega carruurta iyo dhinacyada kale ee daneynaayo, ee ku saabsan Adeegyada Baarista Hore iyo Wakhtiyaysan, Ogaanshaha, iyo Daaweynta (EPSDT) ee la siiyo carruurta iyo qaangaarada ka diiwaangashan Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP). OHA waxay si dhab ah u qaadatay falcelintan.

Ka dib markii si taxadar leh loo tixgaliyay fikradaha bulshada iyo dib u eegis gudaha ee dhamaystiran, Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) waxay gaartay go'aan ah in aysan raadin dib u cusboonaysiinta ka dhaafitaankeeda muddada dheer soo jiray ee ku saabsan faa'iidada EPSDT ee carruurta iyo qaangaarka ee codsiga dib u cusboonaysiinta ka dhaafitaanka so socda ee 1115(a) Medicaid ee qaab-dhismeedkiisa hadda. Codsiga dhaafitaanka, OHA waxay u soo jeedin doontaa Xarumaha Medicare iyo Adeegyada Medicaid (CMS) si ay u daboosho dhammaan daawaynta iyo adeegyada loo go'aamiyay inay yihiin kuwa lagama maarmaanka u ah caafimaadka sida waafaqsan faa'iidada EPSDT, ka dib muddada joojinta, habkan soo socda.

Hannaanka dadweynaha iyo hufnaanta ee Guddiga Dib u eegista Caddeynta Caafimaadka Oregon (HERC) iyo Liiska Mudnaanta la siiyay ee Adeegyada Caafimaadka ayaa sii hayn doona door muhiim ah si loo go'aamiyo faa'iidooyinka OHP ee loogu talagalay carruurta, qaangaarka iyo dadka waaweyn. Oregon waxa ay si gaar ah ula kulmi doontaa shuruudaha faa'iidada EPSDT ee loogu talagalay carruurta iyo qaangaarada siyaabaha soo socda:

- Daaweyn kasta oo la daboolay oo waafaqsan Liiska Mudnaanta Adeegyada Caafimaadka waxaa, asal ahaan, loo tixgelin doonaa mid caafimaad ahaan lagama maarmaan u ah dhammaan dadka ay daboolayso OHP.
- Adeegyada aan lagu daboolin si waafaqsan Liiska Mudnaanta, baahida caafimaad ee adeegyada carruurta iyo qaangaarada gaarka ah waxaa loo tixgelin doonaa xaalad kiis-ilaa-kiis ah sida ay u baahan tahay EPSDT.

Isku diyaarinta kala guurkan, OHA waxa ay qaadi doontaa dhawr tallaabo si ay u hubiso in carruurta, qaangaarada iyo qoysaskooda u qalma Medicaid ay ka warqabaan EPSDT oo ay helaan baaritaanada loo baahan yahay iyo daawaynta lagama maarmaanka u ah caafimaadka. Talaabooyinkan waxaa ka mid ah laakiin aan ku koobneyn:

- HERC waxay dhamaystiri doontaa dib u eegis dhamaystiran oo adeegyada aan hadda la daboolin si waafaqsan Liiska Mudnaanta la siiyay ee Adeegyada Caafimaadka iyada oo fiiro gaar ah u leh baahiyaha gaarka ah ee carruurta iyo qaangaarada. HERC waxay hagaajin doontaa Liiska Mudnaanta Si loo hubiyo in dhammaan adeegyada caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah EPSDT ee dadweynaha carruurta iyo qaangaarka la daboolay.
- Wixii adeegyo ah oo aan loo daboolin si waafaqsan Liiska Mudnaanta la siiyay, OHA waxay hubin doontaa inay jiraan wadooyin la heli karo oo waxtar leh oo kiis-ilaa-kiis dib u eegis loogu sameeyo baahida caafimaad sida ay u baahan tahay EPSDT. OHA way ka warqabtaa in hannaanadaani ay noqon karaan kuwo dheer oo culays ku ah bixiyayaasha iyo qoysaska waxayna rabtaa inay horumariso khibradaas. OHA waxay fahamsantahay in carruurta, dhaliyarada iyo qoysaska maareynaya baahiyaha caafimaad ee adag ay u baahan yihiin hannaan la heli karo oo ka jawaabaya baahiyahooda.
- OHA waxay hormarin doontaa hagitaan cad iyo wada xiriirada loogu talagalay bixiyayaasha iyo qoysaska si loo hubiyo inay ka warqabaan isbadelka faa'iidooyinka, oo ay ka mid tahay xuquuqda go'aaminta shakhsiyeed ee baahida caafimaadka.

Si loogu guuleysto hadafka OHA ee ah dabargoynta sinnaan la'aanta caafimaadka meesha lagu gaaro 2030, caqabadaha daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah waa in laga saaraa carruurta iyo qaangaarada sida waafaqsan EPSDT. OHA waxay u mahadcelinaysa falcelinta dhammaan dhinacyada danaynaya ee ku saabsan mawduucan muhiimka ah waxayna rajaynaysaa wada shaqayn joogto ah si kor loogu qaado caafimaadka ilmaha iyo qaangaarada taasoo qayb ka ah dib u cusboonaysiinta Medicaid ee xiga ee gobolka.

18. Xooga shaqaalaha

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	<p>Soo koobida: Aqoonsiga la isku raacsan yahay ee saamaynta ay arrimaha xoogga shaqadu ku yeesheen nidaamka bixinta daryeelka caafimaadka. Fursadaha loo aqoonsaday Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqanka (THWs) inay ka ciyaaraan door kordhay ee ah bixinta adeegyada OHP iyo kordhinta helitaanka daryeelka caafimaadka ee dadka si ay adeegyada uga helaan bixiyeyaasha ay ku kalsoon yihiin bulshadooda. Fursado ayaa u jira dib u habaynta lacag bixinta iyo in wax laga qabto yaraanta bixiyayaasha ee dhulka miyiga ah oo ay ku jiraan bixiyayaasha ilkaha, daawaynta isticmaalka mukhaadaraadka, iyo adeegyada ka hortagga.</p>	
37.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Xubnaha iyo U doodayaasha</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Taageerada ku aadan isticmaalka asaaga ku saleysan iyo shaqaalaha caafimaadka bulshada, gaar ahaan looga baahan yahay dhulka miyiga ah • Waxay muujisay baahida loo qabo in maalgashi dheeraad ah lagu sameeyo xoogga shaqada, gaar ahaan shaqaalaha caafimaadka bulshada, fool-bixisada, booqdayaasha guriga, iyo kormeerayaasha asaaga si loo taageero caafimaadka qoysaska • Codso in Oregon ay ka shaqeeyso abuurista dhiiragelinada iyo kordhinta fursadaha loogu talagalay dadka midabka leh ee lagu shaqaaleysiyo goobaha caafimaadka ama rugaha caafimaadka si ay wax uga qabtaan dhaawacyada jilka iyo kalsooni darada ka jiraan bulshooyinka dhexdooda si ay dhammaan u helaan daryeel siman oo habboon. • Codso badelka qaababka lacag-bixinta ee ku saabsan caafimaadka habdhaqanka carruurta, gaar ahaan: <ul style="list-style-type: none"> ○ Maalgeli daryeelka bulshada ku salaysan isku xiraaya qoysaska ku leh adeegyada gurigooda, bulshada, ama dugsiga 	<p>Jawaabta:</p> <p>OHA waxay u mahadcelineysaa faallooyinka aad ka u badan ee ku saabsan arrimaha la xiriira shaqaalaha daryeelka caafimaadka. Waxaan aqoonsannahay baahida loo qabo maalgelinta shaqaalaha daryeelka caafimaadka, gaar ahaan caafimaadka habdhaqan ahaaned. OHA waxay sidoo kale u mahadcelineysaa taageerada ku aadan soo jeedinta lagu balaarinayo isticmaalka Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqanka (THWs) ee ku jira codsiga ka dhaafitaanka.</p> <p>OHA waxay qiimeysay tallooyinka ay bixiyeen Guddiga Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqanka waxayna ku dartay dhowr tallooyinka gudaha codsiga. Tan waxaa ka mid ah soo jeedinta in adeegyada asaaga lagu bixiyo in aan lagu xaddidin qorshaha daaweynta, diiwaangelinta shaqsiyaadka cadaaladda ku lug leh ka hor 90 maalmood siideynta, codsashada caymiska gaadiidka aan caafimaadka ahayn si loo helo adeegyada taageerada SDOH, taageerooyinka guryeynta oo ay ku jiraan caawimaada kirada, iyo isbadellada la soo jeediyay ee halbeegyada si loo dhiirrageliyo</p>
38.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: CCO, Isbitaalka, iyo Wakiilada Nidaamka Caafimaadka</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Balaari awooda OHP ay u leedahay inay u isticmaasho iswaafaqa dowlada dhexe ee ku aadan adeegyada Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqanka (THW). • Waxaa gabaabsi ka jira bixiyeyaasha ilkaha, gaar ahaan meelaha miyiga ah. • Walaaca ku saabsan qodobka faa'iidada gaadiidka ee kharash-ku-ool ah ee ka jira aagaga miyiga. • Codso in OHA ay caddeyso ama ay u sameyso shahaadada ogolaanshaha shuruudaha iyo shuruudaha kormeerka ee loogu talagalay Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqanka (THWs) • Codso xaqiijinta in kelmadda "asaag ka soo kabashada" uu ka koobnaan doono takhasuslayaasha asaaga ah kuwaas oo baaxada shaqadooda ay ka mid tahay caawinta shakhsiyaadka sida ay uga 	

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
	<p>soo kabsanayaan caafimaadka habdhaqanka iyo cilladaha isticmaalka muqaadaraadka.</p> <ul style="list-style-type: none"> • Walaaca in Guddiga Shaqaalaha Caafimadka ee Gobolka ay ku taliyeen hormarinta ka dhaafitaanka kuwaas oo aan ka muuqanin qabya-qoraalka codsiga 	<p>hormarinta sinnaanta caafimaadka. Tallooyinkaan ka dhacay meel ka baxsan baaxada ka dhaafitaanka ama aad ugu habboonaa in lagu sii wado iyada oo loo maraayo qandaraas ama Wax ka badelka Qorshaha Gobolka ayaa la tixgelin doonaa mustaqbalka.</p>
39.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Daryeelka Caafimaadka, Ururka Bulshada, iyo Bixiyayaasha Adeegga Bulshada</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Codso in OHA ay wax ka qabato helitaanka arrimaha daryeelka ee loogu talagalay adeegyada dhibaata ka warrama marka bixiyayaasha la heli karo laakiin aan qandaraas kula jirin CCO-da ku taalo dhulka miyiga ah • Xaqiiji in Shaqaalaha Caafimadka Dhaqanka, Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada, Kormeerayaasha – lagu daboolay mushaar lagu noolaan karo si kor loogu qaado tayada iyo tirada jagooyinkan ee ka jira gobolkeena. 	
40.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Sharci-dejiyayaal / Siyaasad-sameeyayaal, u ololeeyayaasha Siyaasada /Kooxaha Danaha Gaarka ah</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Helitaanka furan ee bixiyayaasha shabakada badqabka iyo bixiyayaasha kale ee bulshada ayaa u abuuri doona isbadel macna buuxa leh helitaanka bukaanka iyo culays bixiyayaasha • Waxaa la xoojiyay baahida loo qabo kordhinta helitaanka tayada ka hortagga iyo galmada iyo daryeelka taranka marka la dejinayo shuruudaha loogu talagalay shabakadda bixiyaha CCO • Walaacyada ku saabsan awooda xubnaha OHP ay u leeyihiin inay daryeel ka helaan bixiyayaasha bulshooyinkooda gaarka ah iyada oo aan loo eegin goobta ama haddii ay yihiin kuwa "ku jira shabakada" CCO-dooda • Marka la dhisayo shuruudaha shabakadda bixiyaha CCO, faalo-bixiyayaasha waxay iftiimiyeen muhiimadda ay leedahay in daryeelka laga helo shaqaalaha caafimaadka bulshada, kormeerayaasha caafimaadka gaarka ah, fayoobaanta asaaga iyo takhasuslayaasha taageerada iyo fool-bixiso si loo hubiyo kalsoonida ka dhexeyso bixiyayaasha iyo bukaanada, iyo oggolaanshaha adeegyada dhaqan ahaan u jawaabaya xubnaha OHP • OHA waa inay raadisaa noocyada kale ee shaqada daryeelka/bogsiinta bulshada ee aan dhaqanka ahayn tan shuruudaha dowlada dhexe taas oo aan u ogolaan karin in la bixiyo ama aan loo tixgelin karin inay yihiin Shaqaalaha Caafimaadka dhaqanka (THW) 	

#	Soo koobida Faallooyinka La Helay	Jawaabta OHA
41.	<p>Kooxda Dhagaystayaasha: Iskaashatooyinka Dowladda</p> <p>Soo koobida Faallooyinka:</p> <ul style="list-style-type: none"> Taageerida adeegsiga hababka shaqsiya iyo bulshada udub dhexaad u ah sida Kormeerayaasha Caafimaadka Shaqsiyeed, Shaqaalaha Caafimaad Dhaqameedka, Takhasuslayaasha Taageerada Asaaga iyo Takhasuslayaasha Fayoobaanta Asaaga 	

Waxaad ku heli kartaa dokumintigaan luuqado kale, daabacaad balaaran, qoraalka camoolka ama qaabka aad doorbidi. Kala xiriir Barnaamijka Wacyigelinta Iskaashatada Bulshada (Community Partner Outreach Program) community.outreach@dhs.oh.state.or.us ama adigoo wacaya 1-833-647-3678. Waanu aqbalnaa dhammaan wicitaannada dadka dhagaha adag ama waxaad garaaci kartaa 711.